Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 7-aad
Documentiga Kalfadhiga 7-aad kulankiisa:17-aad Tr:07.12.2015

Kalfadhiga 7-aad

Kulankiisa:17-aad, Sacada furitanka.12:44 gh, Sacada Xiritanka.13:46 gd.

Guntinta:139 xildhibaan.

Ajendaha:-

1.Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka

2.Ansixinta Ajendaha

3.Akhrinta 3aad Sharciga Iibka Qandaraasyadda iyo Dheef Wadaaga Qaranka

4.Akhrinta 1aad Mashruuc Sharci ku saabsan ilaalinta bedqabka Dhulka iyo Xuduudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

5.Qaybinta Xeerka Qoondaha Miisaaniyadda 2016

6.Qaybinta Sharciga ka hortagga Lacag dhaqida iyo Maalgalinta Argagixisada.

Shir-Guddoomiye, Guddoomiyaha Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Mudane**:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari.**

1.Waxaa shirka Furay Guddoomiyaha Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari, waxaa lagu furay Aayadaha Qur'aanka kariimka Uu akhriyay Xildhibaan :Ibraahim Saalax Dayfulah.

2.Guddoomiyaha Golaha Shacabka wuxu xildhibaanada u soo jeediyay in ay ansixiyan ajendaha Xildhibaanada wey ansixiyan Ajendaha.

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu soo jeediyay,mudanayaal inla ilaaliyo xaadirinta wayo, kaqeyb galka waa muhiim guddoonka iyo guddiga joogtada waxay go'aan ku garay xildhibaankii maq nada in Laga joojiyo gunada ilaa uu soo maro guddiga anshaxa.

Guddoomiyaha Golaha,waxaan u yeeraya Guddoomiyaha guddiga maaliyadda,

3.Xildhibaan:Samaan Sheekh Daahir,wuxuu soo jeediyay,Hindise sharciyeedka iibka hantida Qaranka waa akhrintii 3aad, markii hore aadbu isugu dhexdaadsana juhdi badan ayaan galinay Waxaan aadnay Nayrobi si qubaro ku xeel dheer aan ula kashano, sharcigaan aad buu muhiim u yahay waxan ku kordhinay laba arimood oo kala ah, Erayada iyo siiqada si wanaagsan ayan ugu soo shaqeynay,daahana wuxuu ka yimid dhanka xukuumada,warbixinta waxa ino akhrina Guddoomiyaha guddi hoosadka.

Xildhibaan:Mahdi Cali Cusmaan,wuxuu si wanaagsan u faah-faahiyay Hindise Sharciyeedka iibka iyo Qandarasyada Qaranka, sida aad la socotaan sharcigaan wuxuu horay u maray akhrinta 1aad iyo 2aad oo marar kala duwan halkan laga jeediyay,waxaan hubaa inaan wax badan ka faa'iideysannay fikradihii iyo sixitaannadii aad ku soo biiriseen.

Guddiga maaliyaddu sharcigaan wuxuu galiyay dadaal fara badan dhinaca diyaarinta iyo tifaftir Kiisaba,waqtigii guddiga loo soo gudbiyay si aad ah ayuu isu dhex daadsanaa oo akhrintiisa ay adkeyd, sida aad aragteen sharcigu waa mid aad u balaaran, wuxuuna ka kooban yahay sadex sharci oo lamideyay sida iibka iyo Qandaraasyada, wareejinta adeegyada dowlada oo lagu Wareejiyo hay'ad gaar ah si ay u sii horumariyaan iyo hawl ka saaridda (iibinta) qalabka gaboo bay ee dowlada,qalabkan intiisa badan waa arrimo farsamo.

Fiiri Lifaaqa.

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu soo jeediyay,xildhibaanada raba in ay ra'yi ka jeediyan waa in Ay is qoran.

Xildhibaan:C/laahi Sheekh ismaaciil,wuxuu sheegay,sharcigaan waa loo bahanyahay wuxuu Wax ka qabanaya musuq masuqa,waxaan jeclan lahaa in la ii macneyo Erayga dheef wadaag,

Laguna bedelo tar tan loo siman yahay,Eray bixinta meesha lagu qoray, waa in lagu qora iibka Qandaraasyada,waa in laga saaro dheef wadaag.

Xildhibaan:Samaan Sheekh Daahir,wuxuu soo jeediyay,sharcigaan waa 3 sharci oo la mideyay Waa adeega dadka loo dhiibayo oo fai'dada ka soo baxda ayaa loo la jeda dheef wadaag hadi Xildhibaanada ay Eray ka Wanaagsan hayan waa in ay nagu biiriyaan.

Xildhibaan:Shuuriye,wuxuu sheegay,sharcigaan waa muhiim wana isa saran yahay,waxan soo Jeedinlaha sharcigaan in laga dhigo dadka iyo dowlada ayaa shirkad ku ah,waa in laga saro Erayga dheef wadaag.

Xildhibaan:Dr: Cilmi,wuxuu soo jeediyay,Erayga dheef wadaaga waa adeeg wax qabad,ha noq Oto adeeg gudaha ama adeeg dibada ah waa wajiyo ka mid ah wada lahansho ganacsi gaar Ah oo ay wada leeyihiin, hadii fai'do ka soo kororto shirkadaha waa in la qeybsada,qeyradka dalka adiga ma soo sari kartid waxaa soo sari kara kambaniyada, sida wadooyinka la dhisayo fai'dada ka soo baxda waa in lagu wareejiyo xukuumada,fai'dadaas soo baxday sida lo wadagi lahaa ayaa la yiraahdaa dheef wadaag.

Xildhibaan:Sahro Qoor Shal, waxay sheegtay, aniga waxan ku raacsanahay xildhiban.Shuuriye Waa sharci muhiim ah waa in lagu celiyo akhrinta 3aad

Guddoomiyaha Golaha,wuxu soo jeediyay,sharcigaan waxa la kenay kalfadhiga marku furmay Wuxuu marayaa akhrintii 3aad mooshin waa noqon karaa.

Xildhibaan: Jaamac Oday,wuxuu sheegay,aniga waxaan ka tirsanahay guddigan ,sharcigan waa Muhiim waa Kii looga baxayay musuq- masuqa,hadii cawa la soo akhriyo wa la dhameyn kara

Xildhibaan:Saciid Maxamed Cali,wuxuu soo jeediyay,guddiga wey mahadsan yihiin sharcigaan Iibka iyo qandarasyada wey ka soo shaqeyan waxaa loga hortagaya musuq-masuqa, sharcigan Waxaa loo sameeyay dadweynaha gaar ahaan beeqaminta dowlada, balse waxaan doonayna In nalo faah-faahiyo dadka shisheyaha waxa ay shar ku leeyihiin

Xildhibaan:Sacdiyo Cumar Sheegow,waxay soo jeedisay,waxaan u mahadcelinaya guddigii ka Soo shaqeyay,sharcigan mar hore ayaa la kenay Golaha Shacabka, waxan ka hadleyno waa Masiirka umadda soomaaliyeed madama uu sharcigan muhiim yahay waa in la soo akhrino Oo waqti yar lagu daro ka dibna la ansixiyo.

Xildhibaan:Mahdi Cali Cusmaan,wuxuu soo jeediyay,beesha caalamka way na dhowrayaan Waxaa Loola jeeda, beesha caalamka way na sugayan in Barlamaanka ansixiyan,xildhib:siciid warqada dib u fiiri.

Xildhibaan:Samaan Sheekh Daahir,wuxuu sheegay,waxaan ka hadleyno waa sharci qofka waa in uu yiraahda Qodobkas wax halaga bedelo, Qodobkas wax ha lagu daro,dadka shar Cigaan qoray markii hore qabiir kuma ahayn waxaan u geynay Soomaali pen,dadka qubarada Ah iyo anaga Wan isla garanay in garyaqaanka guud loo geyo si uu u saxo siiqada ka dibna uu U akhriyo wayo isaa ku shaqa leh,waa in la soo akhriya sabtidana loogu codeyo.

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu soo jeediyay,waxaan idiin xusuusinaya Qod.50 aad ee xeer Hoosadka F1-F2, marka Hindise Sharciyeedka ka gudbo akhrinta 3aad qodobada la doonayo In wax laga bedelo ama wax lagu daro, waa in lagu wargaliyaa Guddoomiyaha Golaha,iyado Qoraal ah, kasoo ay ku saxiixan yihiin ugu yaraan 10 xubnood,24 saac ka hor inta an la ansixin

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu u yeray, Guddoomiye ku xigeenka guddiga arrimaha guddaha.

4.Xildhibaan:Daahir Aweys Jasow,Guddoomiye ku xigeenka guddiga arrimaha gudaha

Wuxuu golaha shacabka ka hor akhiyay, akhrinta 1aad mashruuc sharci ku saabsan ilaalinta Bedqabka dhulka iyo xuduudaha Jamhuuriyadda federaalka soomaaliya,sharcigaas oo ka ko Oban 7qodob si faah-faahsana u akriyay,waxaa soo diyaariyay guddiyada kala ah Guddiga Arrimaha Dibadda,Guddiga Arrimaha Gudaha iyo Guddiga Difaaca ee Golaha Shacabka si Waafaqsan Qodo.69(1) (b) ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya,wuxu ansixiya dhulka,bada Hawada,Soomaaliya in aan lagu xad gudbi Karin uu yahay muqadas,waxan xornimadda qada

Nay **1da Luulyo 1960kii,** Mudanayaal waxaad noo idmatan howshan anagoo sadex guddi ah Waxaa naga go'an wajibka nasaaran in aan gudano.

Guddoonka Golaha,wuxuu soo jeediyay, ajendahan waxaa ku lifaaqan ilaa 21ka bishan Waa Ajendayaasha soo socda waxna waa laga badali kara waxna waa lagu kordhin karaa.

Xildhibaan:Cabdi Xaashi C/laahi,wuxuu soo jeediyay,xeer hoosadka wixii an waafaqsanan Hadii laga hadlayo waa in cadeya,26kii qeyb ayaa xorowday,1da Lulyo qeyb aya xorowday Barlamaanka waa laba aqal mid ayan lanahay taasina waa su'aal? Maamul goboleedyada waa in aan tixgalina**,** Erayga Federaalka soomaaliya ma qadankarna**?** Side baynu ugu jango'y karna? Xuduudaha wadanka doodiisa wa akhriska 2aad, ciidamada dalka jooga maxasharci ah oo ay dalka ku joogan? Barlamaankii hore wey diidan dalalka dariska ah ciidamadooda arrimo badan ayaa loo bahan yahay in laga hadlo Barlamaanka wa in u ka dooda federaalka

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu soo jeediyay,su'aalaha in ay ku koobnadan akhrinta 1aad Akhrinta 2aad in la sameyo wax ka bedel sharciga, Qod.69aad ee xeer hoosadka,qodobada Ku saabsan wax ka bedelka qabyo qoraalka miisaaniyadda federaalka ayaa loo isticmaalaya hogaaminta wax ka bedelka qabyo qoraalka ka dib miisaaniyadeed meesha ay iskaga midka yihiin marka laga rebo waqtiyeynta xadideysa soo jeedinta sadexmaalin ka hor maalinta fadhi ga golaha,markii uu ansixiyo Golaha waxaa faafin rasmi ah ku soo sarayo madaxweynaha JFS.

Xildhibaan:Goodir,wuxuu soo jeediyay,maadama ay halkan ku xusnayn miisaniyadda ciidam Ada Qod.1aad F-2aad, xornimada waxan qaadanay 1960kii, ilaa manta xadkeena meel lagu Xadeyay manaqano.

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu soo jeediyay,Akhrinta 2aad dib aynu u dhigano

Kalfadhiga 7-aad Kulankiisa:17-aad,uu shir Guddoominayay Guddoomiyaha Golaha Shaca bka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari

uu sheegay in uu shirka xiran yahay sacada markey ahayd 1:46 gd.